



Baritaanka caafimaad ee ilmaha dhashay

Waa maxay baaritaanka cunugga?

Baaritaanka caafimaad ee ilmaha dhashay waxaa lagu ogaadaa cudurro tiro yaraakiin halis ku ah caafimaadka ilmaha. Baaritaankani waxaa lagu ogaadaa 25 cudur oo kala duwan. Waxaa baaritaankan muhiim u yahay:

- Cudurradani way qarsoon yihiin markuu ilmuhu dhasho.
- Baaritaankani waxaa laga ogaadaa in ilmuhu xanuunsan yahay. Cudurka oo goor hore la ogaadaana waxay keentaa in ilmuhu dawo degdeg ah helo.

Ilmaha Victoria ku dhasha badankood way caafimaad qabaan. Hase yeshee in yar ayaa laga helaa cudurradan halista ah. Ilmaha qaarkood cudurradan naftooda ayay halis geliyaan haddaan laga gaarin. In aad u yar, ayaa takhaatiirtu daawayn kari waayaan.

Goorma iyo sidee loo baari karaa cudurradan?

Baaritaankani waxaa lagu sameeyaa si degdeg ah, wax dhibaato ahna uma leh ilmaha, waxaana heli kara cunug kasta ee Victoria ku nool. Inta u dhaxaysa maalinka labaad iyo kan saddexaad ka dib ilmuhu markuu dhasho, ayaa ummulisadu ku dhibcisaa kaarka baaritaanka ilmaha dhawr dhibcood oo dhiig ah laga qaaday ilmaha. Dhiigana waxaa laga qaadaa marka ciribta cunugga lagu duro cirbad yar. Tani waxay keeni in ilmuhu dhibsado in yar. Nuujin ama hab la siiyo marka la durayo ilmaha way kaalmaysaa.

Kaarka baarista waxaa loo dirayaa Royal Children's Hospital ee Melbourne. Inta badan baarista jawaabteedu waxay sheegtaa in ilmuhu caafimaad qabaan. Haddii baarista lagu ogaado in ilmahaagu uusan caafimaad qabin, takhtar ama umuliso ayaa kuu sheegi doona. Waxay kaloo kuu sheegi doonaan waxa laga qaban karto.

Maxaa dhacaya baaritaka ka dib?

Kaarka baarista ilmahaaga oo uu ku yaal dhiiggii ayaa lagu hayn doona laba sano cisbitaalka Ilmaha- Royal Children's Hospital. Waxaa dhiigga ilmaha loo kaydinaya in baaris labaad lagu samayn karo haddii loo baahdo. Cisbitaalkuna wuxuu uga baahanyahay dhiigga inuu ku hubiyo in qalabka wax baara ay si fiican u shaqaynayaan.



Laba sano ka dib, kaarka baarista waxaa lagu kaydiyaa meelo lagu xafido ee dhaqaaleeya, waxaana lagu ilaaliyaa sharci dawladeed.

Markuu kaydsan yahay, kaarka waxaa isticmaali kara:

- Takhtarkaaga, haddii baaritaan kale loo baahdo.
- Haddii ay maxkamadi codsato.
- Iyo haddii looga baahdo cilmi baaris, iyadoo magaca laga tirayo.

Waxaad codsan kartaa in kaarka dhiigga ilmahaaga loo isticmaalo cilmi baaris caafimaadeed. Magacaaga iyo arrimaha adiga kuu gaarka ah midna ka muuqan mayso cilmi baaristan. Oggolaanshaha cilmi barista waa mid sakhsiyeed, yagna kaa horistaagin ilmahaaga in la baaro.

Oggolaanshaha baaritaanka imahaaga

Inta aan dhiig laga qaadin ilmaha, waxaa lagaa codsan doonaa in lagaa helo oggolaansho baarista ilmahaaga. Waxaa kaloo lagu wayddiisan doonaa inaad tiraahdo 'haa ama maya' in loo isticmaali karo cilmi baaris kaarka ilmahaaga. Kaarka baaristu sidan ayuu u egyahay:

Oggolaanshaha baaritaanka cunugga yar


Waan helay, waana fahmay akhbaarta ku saabsan baarista cunugga. Waan oggolahay in cunugayga laga qaado dhiig lagu baarayo caafimaadkiisa

Isticmaalka baarista sare

Waan fahamay in haddii dhiiggan marka la kaydiyo, marmar loo isticmaali karo cilmi baaris sare. Waxaan doortay in cunuggayga dhiiggiisa loo isticmaali karo cilmi baaristan.

Wixii faahfaahin ah

- kala xiriir umulisadaada
- Fiiri website_kan www.vcgs.org.au/pathology/nbs (Afka Englishka keli ah)
- Waxaad kaloo wici kartaa telefonkan (03) 8341 6200 si aad u aragto qof ka tirsan klinikada cudurrada layska dhaxlo ee Victoria, ee kaala taliya baaristan cunuggaaga



SOAK BLOOD FROM THE OTHER SIDE

VICTORIAN NEWBORN SCREENING LABORATORY

Hospital Name
and ward

COMPLETE ALL DETAILS OR USE HOSPITAL LABEL BELOW

Baby's

FULL NAME

Mother's

FULL NAME

UR

Doctor's Name

Date of birth / /

time

24:00hr

Date of sample / /

time

24:00hr

Gestation: weeks

Current weight: g

Twin ¹/₂

Breast

Formula

Feed

Type

TPN

Male

Female

Relevant Clinical / Family History

Collector's Name

Newborn Screening Consent

I have received and understood the information in the newborn screening brochure. I consent to my baby having blood collected for the newborn screening test.

Yes

No

Secondary Research Use

I understand that blood from stored screening cards can be used occasionally for de-identified health research. I choose to make my baby's blood sample available for this purpose.

Yes

No

Parent Signature: _____

Date Printed 06/2011